Somaliska
Arbete åt alla

Shaqohelida loo wada dhan yahay

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Shaqada raashin oo keliya laguma helo. Waxay kalo keenta kalsooni, saaxiibada shaqada iyo fursad ka qaybqaadashada dhisida bulshada. Sidaas awgeed, shaqohelida loo wada dhan yahay waa arrin muhim u ah xisbiga socialdemokratigaiga. Sidaas awgeed, dhammaan dadka shaqo dalka Iswiidan ku haysto waa in ay ku helaan shuruud loo wada siman yahay.

Ummada dhammantood waxay xaq ku lee yihiin shaqo iyo awood ay ku helaan nolol-maalmeedkooda
Maalin kasto waxaa la abuura shaqo cusub, laakinse hab xasilan ayaa loo abuura. Sidaas awgeed, waxaan hirgeli doona qorshe shaqo oo weyn kaaso dhalin doono 55 000 oo shaqooyin cusub, boosas waxbarasho iyo tababbarrada shaqada. Qorsheha wuxuu kalo ka kooban yahay 20 000 oo loo yaqaanno "plusarbete". Iyadoo qorshehaas la adeegsanaayo ayaa dadyoowga muddo dheer shaqo la'aan ahaa ku helayaan fursan ay cagta ugu dhigaan suuqa shaqada, iyado isla markaas sare loogu qaadi doono adeegga xannaanadda carruurta, dugsiyada iyo xannaanada waayeelada. Qorsheha wuxuu kalo ka kooban yahay 10 000 boos waxbarasho oo loogu talaggalay in "vårdbiträden" ay bartaan xirfada "undersköterskor" oo ah

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad ah mise aad dooneeyso inaad xubin ka noqoto xisbig aocialdemokratiga, booqo hoyga Internetka ee socialdemokratigana.se mise wac taleefanka 08-700 27 27

kalkaalisooyinka caafimaadka hooseeya iyagoo isla markaas boosaska ugu durkaayo kuwa muddo dheer shaqolaawe aahaa.

Siyaabaha kale ee an shaqada ku abuuri doono waxaa ka mid ah:

- 4 000 boosaska tababbarka shaqada ee loogu talaggalay shaqolaaweyada shahaado jaamacad haysato, lagan siiyo shirkadaha yaryar.
- 3 330 boosas cusub ee hey'adaha dowladda, sida kuwa la dagaalammo dambiileyaasha dhaqaalaha iyo kaalmo-dhaqaaleedyada qiyaanada lagu qaato.
- Kharashka ganacsadeha u bixiyo waxaa qiyaastii hoos loo dhigi doona boqolkiiba 10, sannadka ugu horreeyo ee u qorto shaqaalehiisa ugu horreeyay.
- 500 boosas waxbarasho loogu talaggalay xirfadaha xannaanada, siiba daryeelka dambiileyada, daryeelka dadka u dhibaataysan dhibaatooyinka maandooriyeyada iyo dugsiyada.
- 13 000 tababbar shaqo cusub sannadkaan, 10 000 sannadka 2007.
- 17 500 boosas cusub dugsiyada sare.
- 3 000 boosaska lagu tababbaro dhallinyarada da'dooda u dhaxeeyso 20 ilaa 24 sano kuwaaso aanan haysan shahaada dugsiga sare.
- 1 000 boosas cusub ee tababbarka xirfadaha sare.

Shaqo horumarin keento, oo aanan dhibaato keeni doonin

1990-tameeyadii dhibaatooyinkii dhaqaalada jireen, waxaa la illooway doodi ku saabsanayd shaqada wanaagsan. Waxaa la kordhiyay tirada shaqooyinka kumeelgaarka ah, saacadaha shaqada oo aanan wanaagsanayn iyo kadeediska oo sare u kacay. Waxaa ku xigay jirro isku qorida. Dhowr sano oo shaqo ah taaso caafimaadxummo dusha ku sidatay, waxaa ugu danbeeyntii lagu guleeystay in laga weeco wadaddii xumayd ee lagu socday. Tirada dadyoowga jirrada ku qoran waxaa la rajeynaa in barkiiba hoos loo dhigo 2008. Waxaa hab aana mugdi ku jirin loo calamadeeyay mas'uuliyada shirkadaha shaqada bixiyaan, waxaana xilliga kuleelaha sare loo qaadi doona heerka u ku salaysanyahay caymiska jirrada. Caymiska dhaawacyada shaqada waa la sii hagaajiyay, waxaana la kordhin doona tirada curyamada shaqada oo shaqo heli karo iyado isla markaas la kordhin doono mushaharka iyaga u gaarka ah. .

Badbaadinta waa loo baahan yahay markii shaqo la raadsanaayo iyo markii shaqo la haysto

Qof kastaba waxaa ku dhici karto shaqo la'aan. Xaaladaas saamayn ku yeelan doonto caafimaadka nafsiga iyo dhaqaalaha ba. Taaso la dhigmata iyadoo lagu ciyaaray awooda aadenaha iyo dhaqaalaha ba. Sidaas awgeed, waxaa loo baahan yahay waddooyin badan oo la maro suuqa shaqada. Haddana waxaa loo baahan yahay xeerka xuquuqda shaqada ee culus, kaaso ka hortegaayo kala soocida iwm. Iyo heeshiiska ururrada shaqaalaha iyo shaqobixiyeyada kaaso lagu helo mushahar macquul ah.

Waxaan doonayna in an dib u habaynno nidaamkii kala horeenta ee ku xusna xeerka badnaadinta shaqo qorida “LAS”, oo an ciribtirno nidaamka macnehiisu ah in shaqobixiyeha u shaqeeyaa ilaa tobban qof, u ka fogeyn karo labo qof nidaamka kala horeenta haddii aj jirto shaqo la’aan. Waxaan xoojin doona badbaadada shaqoqorista ee waalidiinta fasaa ah, sidii fasaxa waalidiinta loogu isticmaalin sida xilliga digniinta shaqa ke erista. Waxaa xaq laga dhigi doona shaqanta sideed sac maalintii, anago isla markaas suurtagelin doono shaqada afarta sac maalintii. Waaxan doonayna in an adkaynno fursadda helida shaqada joogtada ah, waxaa kaloo doonayna in sare u qaadno heerka kaalmada shaqolaaweyaalka, sidii dadka badidooda ay u qaatan boqolkiiba sideetan mushaharkii berri hore ee qaadan jireen markii shaqo la’aan ay ku dhacdo.

Wax ku bediladeeda
Isbahaysiga midigta ee xisbiga moderateratiga u hogaamiyo wuxuu shaqaalaha dalka ku taxadinayaa qorshe aad hoos loogu dhigo caymiska shaqolaaweyada iyo siyaasad wajihan suuqa shaqada ee xun.

- Xisbiga moderateratiga wuxuu doonayaa innnuu miisaniyada suuqa shaqada ka jaro lacag dhan 8 biljan. Wuxuu doonayaa innuu ciribtiro dadaalkii awoodyeelka ee suuqa shaqada, kaaso ummadda siin lahaa fursad ay shaqo cusub ku helaan.
- Xisbiga moderateratiga wuxuu doonayaa innuu magdhowga shaqolaaweyada wax ka dhimo, uu ka dhigo boqolkiiba 65, imminka waa boqolkiiba 80. Isagoo isla markaas doonayaa in uu aad sare ugu qaado kharashka khasnadda shaqolaaweyada. Xisbiyada midigta waxay kaloo doonayaan in ay keenaan qorshooyin kale, kuwaaso saamayn xun ku yeelan doono xuquuqda shaqaalaha, kuwaaso iyagana keeni doono xaalad halis u ah shaqaalaha.
- Straatejiyada isbahaysiga midigta ee xisbiga moderateratiga u hogaamiyo waa mid iska cad – waxay doonayaan in ay kordhiyaan badbaadinxummad iyo awoodxummada shaqaalaha, waxay ummadda ku dirqinayaan in ay aqbalaan shaqo musharkeeda hooseeyo iyo shruurud aanan wanaagsanayn. Qorshehooda wuxuu abuuri doona in ummadda lagu dirqiyo ka shaqaynta shaqo mushaharkeeda nolol-maalmeedkooda ku filnayn.

Shaqo laguma abuuro iyadoo weerar lagu qaado shaqolaaweyada iyó bukaanada. Runta waxaa ah in badbaadinxummada ay xadayso oona joojiso. Haddii tirada ummada ku nool xaalad aanan badbaadin lahayn lama horumarin karo madaxbannaanimada, awooda abuurida iyo rajada mustaqbilka laga lee yahay.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?